
# Carruurta waaweyn iyo kuwa dhallinta ah waa in sidoo kale la tallaallo!

## Tallaalada Lagu Taliyay ee Carruurta 7–18 Sanno Jirka ah

**Ma rabtaa inaad wax badan ogaato?**
Iskaan garee koodhka QR si aad u ogaato tallaalada ilmahaagu u baahan karo. Ama booqo
https://www2.cdc.gov/vaccines/childquiz/




**MUHIIM AH**

- DHAMMAAN carruurta ku jirta da' kooxeeda waa inay qaataan tallaalka
- DHAMMAAN carruurta ku jirta da' kooxeedka ayaa qaadan kara tallaalka
- QAAR ka mid ah carruurta ku jirta da' kooxeedka waa inay qaataan tallaalka
- Waalidiinta/daryeeleyaashu waa inay la hadlaan bixiyaha daryeelka caafimaadkooda si ay go'aan uga gaaraan in tallaalkani ku habboon yahay ilmahooda iyo in kale

**Kala hadal bixiyaha daryeelka caafimaadka ilmahaaga wixii hagis dheeraad ah hadduu:**

1. Ilmahaagu qabo xaalad caafimaad oo halis sarraysa u gelin karta caabuq ama haddii aad uur leedahay.
2. Ilmahaagu u safrayo meel ka baxsan Maraykanka.
3. Ilmahaaga seegay tallaal kasta oo lagula taliyay da'diisa ama loogu talagalay dhallaanka iyo da' yarta.

www.cdc.gov/vaccines

**WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH**
Wac lambarka bilaashka lagu waco: 1-800-CDC-INFO (1-800-232-4636)
Ama booqo: www2.cdc.gov/vaccines/childquiz/

# Cudurradee ayay tallaaladani kaa difaaci karaan?

7-18 SANNO JIR

| CUDUR TALLAALKA LOOGA HORTAGI KARO | DHIBAATOOYINKA CUDURKA | TIRADA GAROOJOOYINKA TALLAALKA |
|---|---|---|
| **HPV** **(Fayrasyada feexda)**<br>Waa cudur fayras oo faafi karo oo lagu kala qaadi karo is-taabashada jireed, oo ay ku jirto xilliga galmada | Burooyinka ku dhaca xubinta taranka iyo noocyo badan oo kansarada xilliga waayeelnimo, oo ay ku jiraan kansarka ilmo-galeenka, farjiga, guska, futada, iyo cunaha | 2 ama 3 garoojo |
| **Teetanada** **(Kala-wareega qalka)*** Cudurka waxaa keena manka bakteeriyada ee laga helo ciidda iyo boorka ka jira meel kasta; manka ayaa jirka ka gala nabarrada ama boogaha | Suuxdin, jajabka lafaha, neefsasho la'aan, dhimasho | 1 garoojo da'aada 11-12 sanno<br>Garoojo dheeraad ah haddii la seego garoojooyinka carruurnimo<br>1 garoojo boogaha wasakhda leh |
| **Gawracatada***<br>Waa cudur bakteeriyo oo faafi karo oo ku dhaca sanka, cunaha, iyo mararka qaarkood sambabada; waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashada | Murqaha wadnaha ee barara, wadne-xannuun, miyir-beel/kooma, curyaanimao/ faalij, dhimasho | 1 garoojo da'aada 11-12 sanno<br>Garoojo dheeraad ah haddii la seego garoojooyinka carruurnimo |
| **Xiiqdheerta** **(Hinraaga)***<br>Waa cudur bakteeriyo oo faafi karo oo ku dhaca sambabada iyo marin-haweedka; waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashada | Caabuqa sambabada (wareento/burunkiito), dhimasho; gaar ahaan ay halista ugu jiraan dhallaanka | 1 garoojo da'aada 11-12 sanno<br>Garoojo dheeraad ah haddii la seego garoojooyinka carruurnimo<br>1 garoojo mar kasa oo uur la qaado |
| **Mininjokokal****<br>Waa cudur bakteeriyo oo faafi karo oo ku dhaca xuubka maskaxda iyo xangulada ama xiddidada dhiigga;  waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashada | Beelida gacanta ama lugaha, dhe, suuxdin, dhimasho | 2 garoojo.<br>Qiyaaso dheeri ah ayaa loo baahan karaa iyadoo ku xiran xaalad caafimaad ama tallaal la isticmaalo. |
| **Ifilada** **(hergab)**Waa cudur fayras oo faafi karo oo ku dhaca sanka, cunaha, iyo mararka qaarkood sambabada; waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashada | Caabuqa sambabada (oof-wareen/burunkiito), caabuqa sanqaroorka iyo dhegaha, xaaladaha wadnaha ama sambabada ee cudurka ku lammaan ee ka sii daraya, dhimasho | 1 garoojo sannad kasta<br>2 garoojo carruurta qaarkood ee da'doodu u dhexayso 6 bilood ilaa 8 sanno |
| **COVID 19**<br>Waa cudur fayras oo ku dhaca sanka, cunaha, ama sambabada; wuxuu u ekaan karaa hargabka ama ifilada.<br>Waxaa lagu kala qaadi karaa hawada iyo is-taabashada | Caabuqa sambabada (oof-wareen/burunkiito); xinjirowga dhiigga; dhaawaca beerka, wadnaha ama kelyaha; COVID-ka raaga; dhimasho | 1 garoojo ama in ka badan oo tallaalka COVID-19 ee la cusbooneysiiyay ee 2023-2024 taasoo ku xiran xaaladda caafimaad. Wixii macluumaad dheeraad ah: **www.cdc.gov/covidschedule** |
| **Busbuska Daanyeeraha (Mpox)**<br>Waa cudur fayras oo faafi kara oo lagu kala qaadi karo is-taabashada, oo ay ku jirto galmada; wuxuu sababaa firiiric xannuun badan, qandho, daal, qufac, dililiq, cune-xannuun, qanjir-barrar. | Nabarrada caabuqa leh, bpermarka maskaxda, caabuqa sambabada (oof-wareen/ burunkiito), caabuqa indhaha, camoolanimo, dhimasho | 2 garoojo |
| **Kaduudiyowga**<br>Waa cudur fayras oo laga qaado qanniinyada kaniicada jirran; wuxuu keenaa qandho, madax-xannuun, indho xanuun, firiiric, kalagoysyo xannuun, jir xannuun, lallabbo, cunto xumo, daal, calool-xannuun. | Dhiigbax daran, qallal, shoog, dhaawac ku yimaada beerka, wadnaha, iyo sambabada, dhimasho | 3 garoojo |

***Tallaalka Tdap** wuxuu kahortagaa cudurrada teetanada, gawracatada, iyo xiiqdheerta

Tallaalka Mininjokokal ACWY (2 garoojo); Tallaalka Mininjokokal B (2 qiy haddii loo baahdo).

Ugu dambeyn la cusbooneysiiyay December 2024